

# **WARBIXIN BARNAMIJKA TURBOCHARGE AMA DHIBCAHA**

## **QALIN-JABINTA IYO KA SAARID IKHTIYAARI AH EE BIXINTA**

### **XOGTA DIIWAANKA WARBARASHADA ARDAYGA**



Dugsiyada dadweynaha ee Green Bay oo kaashanaya asxaabta deegaanka ee tacliinta sare ee, Northeast Wisconsin Technical College (NWTC) iyo jaamacada Wisconsin-Greenbay (UWGB), waxa ay ku faraxsanyihiin inaay siyyaan dhammaan ardayda deegaanka fursad gaar ah oo ay ku xaqiijinayaan in ardaydeennu heli karaan kuleej,xirfado ka dhiga kuwa u diyaarsan bulshadooda si ay ugu guuleystaan noloshan aduunyo ee kala duwanaashaha badan. Yoolka ama hadafka barnaamijkan Turbocharge ama buundooyinka qalin jabinta waxa uu yahay in DHAMMAAN ardayda,laga bilaabo sanadka 2023 ay ku qalin jabin doonaan 15 dhibcood buundooyinka laga rabo kullejka lagu aadi karo.

Maadaamaa dhibcihi amma buundooyinkii qalin jabinta laga hirgaliyay degmada oo idil,ilmahaagu waxa uu heli doonaa faa'iidooyin badan.Ardayda dugsiyada hoose iyo dhexe, NWTC iyo UWGB waxaay siinayaan barnaamijyo waxbarasho oo ka horeeya kuleejka kaasi oo ardayda ku dhiirigalinaya dhaqanka kuleejka,sidoo kale NWTC iyo UWGB waxaay hormarin doonaan oo ardaydu siin doonaan faham weyn oo ku saabsan baahiyaha ardaydeena si ay ardayda u awoodaan inaay ku guuleystaan marka ay qaadanayaan jaamacad laba sano ama afar sano amaba ay isu qorayaan ciidan. Hadafka ama ulajeedka waxay tahay in ardayda ka qalin jabiyaan dugsi sare iyaga oo wata buundooyin u dhigma 15 dhibcood marka ay ka qalin jabinayaan dugsiga sare taasi oo hoos u dhigeysa qarashka guud ee kuleejka. Shaaqalaha NWTC iyo UWGB ayaa siin doona ardayda iyo qoysaska qaabka buuxinta codsiga gargaarka ardayga ee federaalka ee waxbarashada tacliinta sare.Haddii aad dooneysid warbixin dheeri ah oo la xiriirta barnaamijka dhibcaha qalin jabinta ama turbocharge waxaad ka heli kartaa websiteka wasaaradda waxbarashada adiga oo booqanaya ([http://gbaps.org/our\\_district/turbo\\_charge/](http://gbaps.org/our_district/turbo_charge/)).

Si loo fududeeyo barnaamijka turbocharge ee buundooyinka qalin jabinta oo waafaqsan sharciga dowlad-goboleedka iyo federaalka degmada waxaay heshiis la gashay kuleejka NWTC iyo Jaamacadda UWGB si ay ula wadaagaan xogta ku saabsan ardayga sida qaraalada dugsiga sare,xogta imaanshaha,taariikhda diiwaangalinta,jinsiga,jinsiyada iyo dhibcaha qiimeynta. Dhammaan wada-hawlgalayaasha waxaa hagaya sharci fadaraali ah iyo mid gobol arimaha ku saabsan asturida xogta qarsoodiga ah ee diiwaanka waxaayna fulinayaan ilaalinta xogta si loo xaqijiyo in xogta ardayga loo ilaaliyo heerka oogu sareeysa.Macluumaadka ardayga ee barnaamijka turbocharge ee ay hayaan degmada,NWTC iyo UWGB lalama qeybsanayo/wadaagayo cid kale .

Iyada oo Degmada, NWTC iyo UWGB ay wada galeen heshiiskan ayna dhaqan galiyeen fulinta ilaalinta xogta gaarka ah ee macluumaadka,waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxaay xaq u leeyihiin si akhiyaar ah inaay la wadaagi karaan diiwaanka waxbarashada ardayga iyo in kale xaruumaha tacliinta sare.Haddii aad rabtid inaad ka saartid ama aadan dooneyn siideynta xogta diiwaanka waxbarashada ardayga, ka buuxi foom cunug kasta ee qoyskaaga ee aad doneysid inaad ka saartid amaba aad doneyn sii deynta diiwaankiisa waxbarasho .Wixii su'aalo ah ee la xiriira foomkan ama si aad u heshid nuqlud dukumeentiga ku qoran foomkan,fadlan wac waaxda udiyaarinta bulshada xirfadaha kuleejyada ee degmada oo lambarkoodu yahay (920) 272-7645. Foomka ka saaridda barnamijka turbocharge waxa uu dhaqan galayaa laga bilaabo maalinka uu iskuulka soo gaaro ee diiwaanka ardayga ee degmada,Haddii laga reebo in waalidka ama mas'uulka sharciga ah laga joojiyo qoraal ahaan.Waxaan kugu dhiirigalineynaa inaad ilmahaaga kala hadashid go'aankaaga.

---

**Fadlan KALIYEETO buuxi foomka HADDII aadan rabin/dooneyn in diiwaanka waxbarasho ee ilmahaaga aad la wadaagtid xarumaha tacliinta sare si ilmahaaga oga qeyb qaato barnaamijka buundooyinka qalin jabinta ee turbocharge. Hadii aad foomkan soo buuxinin micnaheeda waxa weeye in ilmahaagu kaqeyb qaadan karo manaafacaadka barnaamijkan buundooyinka qalin jabinta ee turbocharge waxaadna ogolaneysaa siideynta diiwaanka waxbarasho ee ilmaaga adigoo siinayo kuleejka NWTC iyo Jaamacadda UWGB.**

**"Ka saarid" bixinta diiwaanka waxbarasho ee aradayga taasoo qeyb ka ah barnamijka turbocharge**

**Magaca ardayga (qor): \_\_\_\_\_ Taariikhda dhalashada: \_\_\_\_\_ Dusiga: \_\_\_\_\_**

**\_\_\_\_\_ MA DOONAYO** ama ogolaanayo inaan la qeybsado ama bixiyo oo aan siiyo diiwanka waxbarasho ee cunugeyga NWTC iyo UWGB taasi oo qeyb ka ah barnaamijka buundooyinka qalin jabinta,dhameystirkha foomkani waan fahamsanahay in cunugeyga/cunugteyda aanan loo ogolaneynin ka qeyb qaadashada qaar kamid ah hawlaha barnaamijyada turbocharge.

**KA JOOG! HA SAXIIXIN HALKAN HOOSE ILAA AAD KA AQRISID OOD KA FAHAMTIID XULASHADA SARE**

**Saxiixa waalidka ama mas'uulka**

**Taariikhda**